
NATIONWIDE CHILDREN'S®
*When your child needs a hospital, everything matters.*

**Helping Hand™** *Health Education for Patients and Families*

# IV: Keydiyaha Kateetarka ee La Tallaalay
# IV: Implanted Port (Somali)

Kateetarka wata keydiyaha yar ee la tallaalay waa aalad la geliyo maqaarka hoostiisa, badanaa laabta, marka daawaynta dabiibida faleenbada/sayloonka iyo daawaynta loogu baahan yahay muddo dheer. Kateetarka wata keydiyaha yar, waxaa sidoo kale loo aqaanaa Implantofix® ama Port-A-Cath®, waxa uu leeyahay labo qeyb oo waaweyn: kateetarka/tuubada iyo keydiyaha (Sawirka 1). Kateeterku waa tuubo jilicsan, dhuuban, caag ah oo la geliyo xididka. Keydiyuhu waa dhisk hool yar oo leh caag silikoon ah oo loo yaqaan septum. Septum-ku dib ayuu isku sajalaateeyaa ka dib markii lagu mudo irbad gaar ah. Keydiyuha ayaa qalliin ahaan lagu geliyaa maqaarka hoostiisa, badanaa laabta.




**Sawirka 1** CIrbada afka-muditaanka leh iyo gummudka duritaan ayaa lagu isticmaalaa keydiyaha kateetarka ee la tallaalay. Cirbadaha qaarkood waxay u ekaan karaan si ka duwan sidoodii hore marka la geliyo.

## Waxa loo adeegsado

Mar haddii katatiirka uu ku jiro xididka, keydiyaha kateetarka waxaa loo isticmaali karaa:


©1989, Waxaa dib loo eegay 2022, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- In lagu siiyo daawooyin.
- Dhiig-ka-qaadis si sheybaarka baaritaano loogu soo sameeyo.
- In lagu siiyo dhiig iyo waxyaabaha dhiig ka sameysan.
- In lagu bixiyo qudinta aan caloosha la marin (parenteral nutrition, IV).

## Faa'idooyinka

- Ilmahaagu waxa laga yaabaa in aanu u baahnayn in la siiyo cirbado duriin oo badan ama kateetarka falleenbooyin ee xididka (intravenous, IVs). Tani macnaheedu ma'aha in aan mar danbe dib loogu dhejineynin.
- Daaweynta la adeegsado falleenbada ayaa lagu siin karaa si fudud oo xanuun yar.
- Marka jeexqamada qalliinka ee goobta keydiyaha kateetarka bogsado iyo ilaa iyo inta aanay jirin cirbad ku meeleeysan meesha, ilmahaagu wuxuu samayn karaa hawlaha caadiga ah. Tan waxaa ka mid ah hawlaha sida:
  - Qubaysashada
  - Ciyaarista isboortiga
  - Jimicsi sameeynta
  - Dabaalashada

## Sida uu Keydiyaha Kateetarku U Shaqeeyo

- Cirbada afka-muditaanka leh ayaa maqaarka soo marta oo gasha keydiyaha kateetarka si sameeyo daweeyn faleebada la isticmaalayo. Waxaad ku isticmaali kartaa maqaarka kareemka kabuubiya ka hor inta aan cirbadda la gelinin.
- Dareeraha faleenbada ama daawada ayaa ku shubanta cirbadda marka ay gudaha ku jirto.
- Faashad cusub, nadiif ah (jeermiga disha) ama faashad ayaa loo isticmaalaa in lagu daboolo oo lagu ilaaliyo cirbadda.
- Haddii faashadu ay dareerto ama ay dabacsanaato, cirbadda iyo faashada waxay u baahan yihiin in la beddelo.
- Ka dib duritaanka gudaha keydiyaha kateetarka, laakiin ka hor intaan cirbadda lasoo saarin, kateetarka waa in lagu nadiifiyaa ama raaciyaa qadar yar oo heparin ah. Heparin ayaa loo isticmaalaa in ay dhiigga ka ilaalisa inuu ku xinjiroobo gudaha tuubada.

## Gelinta Keydiyaha Kateetarka

- Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu tago qolka qalitaanka ama Faragelinta Daaweynta Shucaaca/radiology-ga si loo galiyo keydiyaha kateetarka. Marka si fiican loo geliyo, nafaqada iyo dawooyinka lagu bixiyo falleenbooyinka ayaa la siin karaa, dhiigna waa laga qaadi karaa.

- Meesha go'an ama meelaha go'an ee maqaarka ee loogu baahan yahay in lagu meeleeyo keydiyaha kateetarka ayaa lagu xidhay tolmo iyo/ama xabag loo sameeyay maqaarka oo loo yaqaano DERMABOND®.
- Ka dib markii jeexmada qalliinku uu bogsado, waxaad keliya ka arki doontaa qaabka septum-ka maqaarka hoostiisa.
- Maqaarka ilmahaaga ayaa laga yaabaa inuu ka jilicsanaado gagaarka goobta beeritaanka lagu sameeyay. Tani waa caadi oo waana in ay ku dhamaato dhowr maalmood gudahood.
- Keydiyaha kateetarka ayaa la isticmaali karaa isla marka dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku yidhaahdo waa caadi. Tani waxay caadi ahaan noqotaa 7 ilaa 14 maalmood ka dib marka gudaha la geliyo.
- Qiyaastii 3 toddobaad ka dib marka keydiyaha kateetarka gudaha la geliyo, unugyada jidhka ayaa bogsiin doonaa hareeraha si ay meesha ugu hayaan.

## Daryeelida Keydiyaha Kateetarka

Maadaama keydiyaha kateetarku uu ku hoos jiro maqaarka ilmahaaga, uma baahna daryeel badan.

- Sug 24 saacadood ka hor qubaysashada ama dabaalashada ka dib marka cirbadda laga soo saaro. Tani waxay siin doontaa daloolka cirbadda waqti ay ku bogsado oo ay ku yareeyso khatarta caabuqeed.
- Ka hubi goobta maalin kasta guduudasho, barar, diirimaad, ama calaamado kale oo caabuqeed.
- Dhaq maqaarka goobta la duray inta u dhaxaysa waqtiyada duritaanada ama faleebooyin ku xiritaanada. Samee tan marka aysan jirin cirbad meesha ku meeleysan.
- Marka daaweeyntu dhammaato, ama 7d-ii maalmood ee kastaba, cirbadda ayaa la saaraa oo la bedelaa haddii loo baahdo.
- Haddii aysan jirin cirbad meesha ku meeleysan, faashado looma baahna.

## Digniin

- Tuubada falleenbada ayaa ku duub-duumi karto qoorta cunugaaga. Tani waxay keeni kartaa in ilmahu uu hungurigu xidhmo (dhuunto xidhanto) ama dhinto.
- HA OGA tagin tuubada falleenbada meel ilmaha yaryar ama carruurtu kasoo qaadan karaan ama gaari karaan.

- La hadal daryeelaha caafimaadka ama dakhtarka cunuggaaga:
  — Haddii ilmahaagu uu isku ceejiyo tuubada hore ugu xidhnayd.
  — Si aad u barato talaabooyinka aad qaadi karto si aad u caawiso aadna u hubiso in tuubadu aysan ku duumin qoorta cunugaagta, sida dhigida tuubada meel uusan gaarin cunuga inta ugu badan ee macquulka ah.
  — Walaacyo kale oo kasta ood ka qabi karto in ilmuhu isku ceejiyo falleenbada tuubada ah.
- Haddii cunugaagu dhaawac ka qaado tuubada falleenbada, fadlan dhacdada usoo sheeg FDA-da. Warbixintaadu waxay keeni kartaa macluumaad caawin kara in la horumariyo badbaadada bukaanka. Websaydka lagu soo gudbiyo warbixinta waa: https://www.accessdata.fda.gov/scripts/medwatch/index.cfm?action=reporting.home.

## Daaweynta Maqaarka

Ilmahaagu wuxuu leeyahay halis sare oo caabuq ah sabab keydiyaha kateetarka awgiis ah. Daaweynta Chlorhexidine gluconate (Chlorhexidine gluconate, CHG) ayaa ka caawisaa ka hortagga caabuqa. Inta ilmahaagu ku jiro cisbitaalka, iyo marka la isticmaalo keydiyaha kateetarka, waxay ku heli doonaan daawaynta CHG-ga 1 mar 24-kii saacadoodba maryo CHG ah oo diiran.

- **Ilmahaagu MA heli doono daawaynta CHG haddii** ay ka yar yihiin 2 bilood, ay qabaan xasaasiyad CHG, maqaarkoodu aanu bogsan, ama ay qabaan sababo kale oo aanay u qaadan karin.
- Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga siinta daawaynta CHG adoo raacaya tillaabooyinkan:
  1. Waxaad heli doontaa 6 maro oo aad isticmaasho. U isticmaal 1 maro cudud gacan iyo lug kastaba (4 wadar ahaantii). U isticmaal 1 xagga hore iyo gadaal ee jirjirka (2 wadarta). Ku masax dhaq-dhaqaaq gadaalgadaasha-horhorta ilaa 20 ilbishiqsi meel kasta oo gaar ah. Wax maryo ah dib ha ugu adeegsan meelna.
  2. Ha ku tirtirin maryaha CHG dusha keydiyaha kateetarka haddii la isticmaalay ama la taabtaabtay. Ha ku tirtirin maryaha dusha faashada keydiyaha kateetarka. Haddii faashadu qoydo ama ay dabacdo, u sheeg kalkaalisada.
  3. Ha u adeegsan dharka CHG wajiga, dhagaha, indhaha, sanka, afka ama meelaha gaarka ah (xubnaha taranka). Waxaad ku isticmaali kartaa maryaha Raaxada ee Quweyska® (Comfort Bath®) inaad meelahan ku dhaqdo.
  4. Udaa maqaarka hawada haku qalalee. Haku raacin biyo. U sheeg dhakhtarka ama bixiyaha xanaanada caafimaadka haddii casaan, finan, cuncun, ama dareen-celinta xasaasiyadeed ay ku dhacdo maqaarka.

5. Ha isticmaalin boomaatooyinka jilicsan, kiriimyada, carfisada jirka, ama budooyinka kadib mid ka mid ah maalmaha aad qaadato daaweynta CHG-ka.
6. Kurid dharka CHG jaqafka qashinka. Haku falaashin iyada gudaha musqusha.
7. **Ugu labbis ilmahaaga dharka hurgun ee cusbitaal cusub ka dib daawaynta CHG ee kasta.**

## Ciladaha Suurtagalka ah

Dhibaatooyinka qaarkood ayaa ka dhici karaan keydiya kateetarka ee la tallaalay. Kuwani waxaa ka mid noqon kara:

- Caabuq ka dhaca goobta durida keydiyaha kateetarka ama caabuq ku dhaca dhiigga. Goobta ka fiiri casaan, barar, xanuun ama dheecaan ah hurdi ama cagaar.
- Xinjiro dhiig oo ku jira tuubada ama xididka dhiigga ee arooriyaha ah.
- Dhaqdhaqaaqa keydiyaha kateetarka la beeray iyo cuncunka xiddidka.
- Barar iyo danqasho ay sababtay cirbadda ka siibanaysa keydiyaha kateetarka.
- Dhibaato ka dhalato helitaanka keydiyaha kateetarka si loo geliso cirbada.

## Saarida Keydiyaha Kateetarka ee La Tallaalay

Keydiyaha kateetarka ee la tallaalay ayaa la saari doonaa marka daawaynta falleenbada lagu bixiyo la dhammeeyo. Tani waxaa lagu sameeyaa gudaha qolka qalliinka ama Faragelinta Daaweynta Shucaaca/Radiology-ga iyadoo hoos timaada suuxinta guud.

## Goorta la Wacayo Dhaqtarka

Wac dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii kuwan soo socda midkood dhaco:

- Haddii aad aragto wax guduudasho ah, danqasho, dhiig-bax gudaha jirka, barar, diirimaad, ama dheecaan ka daadashada meesha, ama meel u dhow, goobta duriinka ee keydiyaha kateetarka.
- Haddii ay yeeshaan xanuun, astaamo u eg hargab, ama qandho ka sarreysa 100.4° Fahrenheit (F) ama 38° Celsius (C).
- Haddii uu jiro barar, jidhidhaco, ama xanuun agta ama meel u dhow goobta duriinka keydiyaha kateetarka ama cududa gacan ee ugu dhow keydiyaha kateetarka.